LAXÅ KU SOO DHAWAAW

LAXÅ KOMMUN

# NIDAAMKA DUGSIYADA ISWIIDHAN



# Xannaanada

Ilmaha da'doodu u dhaxeyso sanad ilaa shan jir waxay dhigan karaan xannaanada. Xannaanada ilmaha wuu ku ciyaaraa oo wax buu la baranaa ilmaha kale.

Haddii aad shaqeyso ama aad wax baraneyso ilmahaaga wuxuu dhigan karaa xannaanada laga bilaabo markuu sanad jirsado. Booska uu ilmahaga ka haysto xannaanada waxaad ka bixineysaa kharash.

Haddii aadan shaqey ama aadan waxba baraneyn ilmaha waxa uu tegi kara xannanada caamka ah laga bilaabo markuu saddex jirsado. Ilmaha da'doodu u dhexeyso saddex sano ilaa shan sano waxay dhigan karaan xannanada caamka ah. Xannanada caamka ah waxaa la dhiganaayaa 15 saacadood todobaadkii waana lacag la'aan. Haddii aad rabto in ilahaaga bilaabo xannaanada waa inaa ogeysiisaa degmada.

Degmada Laxå waxay leedahay xannanooyin ku yaala magaalada Laxå, Finnerödja, Hasselfors iyo Tived.

Magaalada Laxå – xannaanada Lindåsen iyo xannaanada Saltängen

Finnerödja - Xannaanada Jordgubben

Hasselfors - Xannaanada Junibacken

Tived – xannaanada Tived

# Xuquuqda dugsiyada iyo waxbarashada khasabka ah

Waa xuquuq iyo waajibaad labadaba in la aado dugsiyada. Iswiidhan waxaa khasab ah in caruurta oo dhan ay aadan dugsiga barbartooniga iyo dugsiga hoose dhexe. Dhamaan caruurta oo dhan waa inay aadan dugsiga laga bilaabo xilliga deyrta ee ay buuxiyaan 6 jir. Taas waxaa lagu magacaabaa waxbarashada khasabka ah. Waxbarashada khasabka waa ilaa fasalka 9aad. Waalidiinta iyo dugsiyada labadaba waxaa mas'uuliyad ka saarantahay in caruurtu aadaan dugsiga.

dhamaan cruurta iyo dhalinyarada waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan. Caruurta qaxootiga ah ee aan haysan sharciga waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan laakiin khasab kuma ahan.

Fasalka barbartooniga, dugsiga hoose dhexe iyo dugsiga sare waa lacag la'aan.

## Fasalka barbartooniga

Laga bilaabo sanadka uu ilmaha 6 jirsado waxaa ilmaha boos ka helaayaa fasalka barbartooniga. Ilmaha hal sano ayuu dhiganaayaa fasalka barbartooniga. Caruurtoo dhan waa inay dhigtaan fasalka barbartooniga.

Degmada Laxå fasalka barbartooniga waxay ku yaalaan dugsiga Finnerödja iyo dugsiga Saltäng.

# Dugsiga hoose dhexe

Dugsiga hoose dhexe waxaa dhigta ilmaha da’doodu u dhexeyso 7 jir ilaa 16 jir. Caruurtoo dhan waa khasab inay dhigtaan dugsiga hoose dhexe. Dugsiga hoose dhexe waxaa lagu bilaabaa 7 jir. Dugsiga hoose dhexe ardayda waxay ku bartaa maadooyin badan oo kala duwan. Waxay noqon karaan taariikh, diin, xisaab, farsamada gacanta, ciyaaraha iyo luqada.

Caruurta naafada ah waxay dhigan karaan dugsi hoose dhexe qaas ah ama u gaar ah. Halkaas waxaa loogu dhigaa waxbarasho ku haboon awoodooda. Degmada ayaa go’aamineysa in ardaygu xaq u leeyahay inuu dhigto dugsiga qaaska ah. Dugsiga qaaska ardayda waxay dhiganaayaan fasalada 1-9

Degmada Laxå waxay leedahay saddex dugsi hoose dhexe. Magaalada Laxå waxaa ku yaala dugsiga Saltäng iyo dugsiga xarunta dhexe (Centralskola). Finnerödja waxaa ku yaala dugsiga Finnerödja.

# Kooxda soo dhaweynta ardayda soo galootiga ah

Caruurta dhawaan timid Iswiidhan waxay bilaabaayaan fasal lagu diyaarinaayo. Halkaan waxaa ardayda ku cusub waddanka lagu siinaayaa tababar afka Iwiidhishka ah. Waxaa kale oo ay baranaayaan sida uu u shaqeeyo dugsiga Iswiidhan. Macalimiinta waxay sameeynaayaan baaritaan ku saabsan waxbarashadii hore ee ardayga. Fasalada diyaarinta waxbarashada ay siinaayaan ardayda way kala duwantahay. Waxay ku xirantahay da'da, luqada ama aqoontiisa hore. Sida ugu dhaqsiyaha badan ardaygu waa inuu u sii gudbaa dugsiga hoose dhexe ee caadiga ah.

Kooxda soo dhaweynta waxay ku sugan yihiin dhismaha dugsiga xarunta dhexe. (centralskola)

# Xarunta xilli faraaqada

Xarunta xilli faraaqada waxaa loogu talo galay caruurta laga bilaabo 6 jir ilaa 12 jir ee dhigta dugsiga. Xarunta xilli faraaqada waxaa kaloo loogu yeeraa dugsi xilli faraaqada. Caruurta waxay xarunta xilli faraaqada aadi karaan marka waalidka shaqeeyo ama wax baranaayo. Dugsiga ka hor iyo ka dib ilmaha waa tegi karaan xarunta xilli faraaqada. Xitaa marka dugsiyada la xiro xarunta xilli faraaqada waa furan tahay.

Magaalada Laxå xarunta xillil faraaqada waxay ku yaalaan dhismaha dugsiga Saltäng iyo dugsiga xarunta dhexe (centralskola). Finnerödja xarunta xillifaraaqada waxay ku taalaa dhismaha dugsiga Finnerödja. Tived iyo Hasselfors caruurta waxaa la siinaayaa daryeel waxbarasho. Daryeel waxbarasho waa bedelka xarunta xilli faraaqada.

Haddii aad rabto in ilmahaaga bilaabo xarunta xilli faraaqada, waa inaa codsataa booska. Waxaad u baahanb tahay inaa codsatid inta uusan ilmahaaga bilaabin xarunta xilli faraaqada.

## Dugsiga sare

Dugsiga hoose dhexe ka dib dhalinyarada waxay aadi karaan dugsi sare. Dhalinyarada oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsi sare. Dugsiga sare waa ikhtiyaari waana lacag la'aan. Dhalinta da'doodu u dhexeyso 16 jir ilaa 20 jir waxay dhigan karaan dugsi sare waase haddii ay ka gudbaan dugsiga hoose dhexe. Waxaa jira dugsi sare oo qaas ah oo loogu talo galay dhalinta naafada ah. Dugsiga qaaska ah waa ikhtiyaari waana lacag la'aan.

Dugsiga sare ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa Hallsberg. Dugsiga hoose dhexe waxaa jooga la taliye waxbarasho oo kaa caawin kara talona kaa siin kara dugsiyada sare.

**Faahfaahinta xiriirka**

Si aad u hesho dugsiga saxda ah ama hawl qabad fadlan la xiriir xiriirinta telefoonka degmada:

**Telefoonka Xiriirinta:** 0584-47 31 00

# XILLI FIRAAQADA, DHAQANKA IYO JAALIYADAHA



Xilli firaaqada waa waqti aad dooran karto waxaa rabtid inaa sameysid. Waxaa jira waxyaabo badan oo kala duwan oo dhaqdhaqaaqa xilli firaaqada iyo dhaqanka ah oo ay degmada ama jaaliyadaha iyo naadiyada ay qabanqaabiyaan

## Meningsfull fritid
## (Xilli firaaqo micno leh)

## Goobta xilli firaaqada

Goobta xilli firaaqada waxaa loogu talo galay ardayda dhigata fasalada 7aad-9aad iyo dugsiga sare. Goobta xilli firaaqada waxaad ku ciyaari kartaa cayaaro, ciyaarta fiidiyoowga iyo kubadda miiska. Sidoo kale waxbaad rinjiyeyn kartaa, wargeysyadaa aqrisan kartaa ama casharaada ka shaqeysan kartaa. Mararka qaar waxaan qabanqaabinaa cayaaraha kubadda iyo dhaqdhaqaaqyo kale oo lagu qabto hoolka Laxå. Halkan waxaa jooga hogaamiyeyaal waaweyn oo laysku halleyn karo. Waxaad iibsan kartaa cunto fudud ama qaxwe. Goobta xillifiraaqada waxay furan tahay habeen walbo oo maalmaha shaqada ah.

# Dugsiga dhaqanka

Dugsiga dgaqanka ee Laxå waxaa loogu talo galay caruurta iyo dhalinyarada laga bilaabo fasalka barbartooniga ilaa iyo dugsiga sare. Dugsiga dhaqanka waxaad tusaale ahaan ka baran kartaa sida loo garaaco qalabka muusikada, loo heeso, loo qoob ka ciyaaro, loo rinjiyeeyo ama loo dhigo masraxa. Ka qeybgalkana waa lacag la'aan. Waxa aad xiiseyneysid waxaad ku qori kartaa bogga shabakada degmada Laxå. Foomka aad buuxisay waxaad u dhiibeysaa hogaamiyaha xilli firaaqada ama la taliyaha degmada dhinaca xilli faraaqada. Sidoo kale telefoon ayaad soo wici kartaa oo aad noogu sheegi kartaa waxa aad xiiseyneyso.

**Faahfaahinta xiriirka**

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqyadeena waxaad ka heli kartaa Edlevo/edWise iyo dhinaca baraheena bulshada.

**Instagram:** Meningsfull_Fritid_Laxå_kommun

**Facebook:** Meningsfull Fritid i Laxå kommun

**Postadress:** Laxå kommun, Kultur och fritid, 695 80 Laxå

**Cinwaanka:** degmada Laxå, dhaqanka iyo xili firaaqada, 695 80 Laxå

**Cinwaanka booqashada:** Kulturens hus, skolgatan 7

**La taliyaha xilli firaaqada:** 0584-47 33 30, 070-241 43 78

## Caruurta iyo dhalinyarada kaniisada

**Caruurta 0–4 jir**

Kyrkis – Ciyaar iyo is dhexgalka Casselgården. Khamiis 9.00 -11.30. wada shaqeynta xarunta qoyska.

Kyrkis ee guriga kaniisada Finnerödja. Isniin walba 10-14.30.

**Caruurta 5–6 jir**

Minisar - ee Casselgården. Talaado walba 16.30-18.00. Telefoonka is diiwaangelinta: 0584-44 46 38

Miniorer - ee Guriga kaniisada Hasselfors oo loogu talo galay 5–7 jirada.

**Caruurta dhigata fasalada 1-3**

Miniorer - ee Casselgården. Talaado walba 16.30-18.00.

**Caruurta dhigata fasalada 4–6.**

Xarunta xilli firaaqada kaniisada ee Finnerödja. Isniin walba 15.30-18.00. Waxaan cayaareynaa kubbada miiska, ciyaaro kala duwan, farsamada gacanta, qaxwe cabid i.w.m. Naadiga filimada ee Casselgården. Khamiis walba 17.00-19.00.

**Dadka xoogaa da'doodu weyntahay**

Dhalinyarada yaryar ee Casselgården. Talaado walba 18.30. Waa wada joogeynaa oo waxbaan isla sameyneyneynaa. Mararka qaar waxaan sameynaa safaro iyo dalxiis.

**Faahfaahinta xiriirka**

**Telefoonka:** 0584-100 20

**Cinwaanka:** Kyrkogatan 6, 695 30 Laxå

**E-post:** bodarne.pastorat@svenskakyrkan.se

# Biblioteket (Maktabada)

Maktabada waxaad ku aqrisan kartaa o ka amaahan kartaa buugaag. Buugaagta taala maktabada waxay ku qoranyihiin luqado kala duwan. Waxaa kaloo ka heli kartaa jariidado, buugaag maqal ah iyo kombiyuutaro aad isticmaali karto. Qof walba waa u furantahay meeshaas ayadoo loo eegeyn daäda, jinsiga ama asalka qofka. Maktabada isticmaalkeeda waa lacag la'aan.

Waxaad su'aalo weydiin kartaa shaqaalaha ka shaqeeya maktabada. Waxay kuu sharxaayaan sida maktabada u shaqeyso waxayna kaa caawinaayaan inaad hesho waxaad raadineysid. Halkaan waxaa kale oo ku yaala goob farshaxan. Qof walba waa booqan karaa goobta farshaxanka.

Hasselfors maktabadeeda waxay leedahay hal armaajo oo buugaagta la saaro oo yaala qolka shirarka ee Hasselgården. Tiveden waxaa taga baabuurka buugaagta wareejiya bishiiba hal mar. Wixii macluumaad dheeri ah weydii maktabadda.

**Faahfaahinta xiriirka**

**Telefoonka:** 0584-47 31 96

**Cinwaanka:** Postgatan 13, Laxå

**Epost:** biblioteket@laxa.se

## Fritidsbanken

bangiga xilli faraaqada waxaad ka amaahan kartaa qalabka ciyaaraha iyo dhaqdhaqaaqyada xilliga firaaqada. Tusaale ahaan waxaad ka amaahan kartaa baaskiilo, koofiyadaha baaskiilka, kabaha barafka lagu taraaraxo, ulaha xeegada iyo kabaha lugaha leh. Qof walba ayaa amaahan kara waana lacag la'aan. Qalabka waxaad haysan kartaa ilaa 14 maalmood. Kadibna waa soo celineysaa wixii aad amaahatay. Haddii aad rabtid inaa qalab amaahato waxaad la xiriireysaa bangiga xilli firaaqada ee Laxå.

**Faahfaahinta xiriirka**

**Telefoonka:** 0584 - 47 31 05

**E-post:** fritidsbanken@laxa.se

**Adress:** Järnvägsgatan 7, 695 30 Laxå (ka soo horjeedka boosteejada basaska iyo tareenada)

Isniin-khamiis: 10.00-18.00

Von Boijgatan 14, barta kulanka 14 amaahda booska:

Khamiis: 16.00-19.00

# Jaaliyadaha degmada Laxå

Jaaliyad waa koox dad ah oo wadajir wax u sameynaaya oo isku dan ah ama isku hadaf ah. Degmada Laxå waxaa ku yaala jaaliyado badan oo xiiseeya wax walbo oo suurto gal ah. Waxaa jira jaaliyado isboorti oo isboortiga noocyadiisa kala duwan ah. Waxaa intaa sii dheer jaaliyadaha qawmiyadaha kala duwan, jaaliyadaha dhaqanka, siyaasadda, muusiga ama farsamada.

la taliyaheena dhinaca xilli firaaqada ayaa kaa caawin kara inaad hesho jaaliyadda ku haboon danahaaga. Bogga shabakada degmada Laxå waxaad ka heleysaa diiwaanka jaaliyadaha oo dhan. Halkaas waxaad ka dooraneysaa inaa ka raadiso magaca jaaliyadda, waxay qabato iyo nooca jaaliyadda ay tahay.

la taliyaha xilli firaaqada: 0584-47 33 30, 070-241 43 78

Bogga shabakada: www.laxa.se

Diiwaanka jaaliyadaha:

# Dadka ku nool meel ka baxsan Laxå

## Finnerödja

Finnerödja IF waxay haysaa hawlo badan oo loogu talo galay dadka raba inay cayaaraan isbootiga ama jimicsanaaya, tusaale ahaan kubadda cagta, jimicsiga bannaanka, discgolf. I Finnerödja waxaa ku yaala waddooyin lagu lugeeyo oo nal leh iyo meel lagu jimicsado oo bannaanka ku taalo. Labada haro ee u dhow waa Unden iyo Skagern waxayna leeyihiin xeebo bacaad ah iyo isboortiga kaluumeysiga.

## Hasselfors

Hasselfors waxaa ku yaala hool lagu cayaaro cayaaraha kala duwan iyo garoon caws leh oo loogu talo galay cayaaraha lama filaanka ah. Waxaa ku yaala jid lagu lugeeyo oo nal leh oo aad ka heli doonto beerta dabiiciga ah ee Lillängens. Ururka tuulada Hasselfors wuxuu qaban qaabiyaa dhaqdhaqaaqyo iyo kullamo badan oo ka dhaca Hasselfors. Dhowr tusaale oo ka mid ah dabaaldegyada filimada iyo bii'adda, dabaaldegga valborg, iyo martiqaadka Hasselfors.

## Röfors

Bar kullan muhiim u ah dadka deggan Röfors waa guriga umadda, halkaasoo lagu abaabulo dhaqdhaqaaqyo kala duwan. Guriga umadda dhinaciisa waxaa ku yaalo meel ay ku cayaaraan ilmaha tuulada iyo meel hilibka lagu dubto oo dabeysha laga xiray. Waxaa kaloo ku yaala barxad boojada lagu cayaaro oo ku taala wabiga agtiisa. Waxaa jira meel lagu dabaasho oo aad u fiican oo ku taala galbeedka harada Laxsjön. Inta u dhexeysa Laxå iyo Röfors waxaa ku yaala jid lagu lugeeyo oo nalal leh oo ay ku yaalaan meel dharka lagu bedesho iyo sawna.

## Tived

Kaniisada Tived waxaa ku yaala beerta qaranka ee Tived, oo ah goob caan ku ah dalxiiska. Tived waxaa ku dhex yaala harada Unden oo leh meel doonyaha yar yar ku soo xirtaan iyo meel yar oo lagu dabaasho. Halkaan waxaa kaloo ku yaala tuulada Sannerud, halkaas oo ay ku yaaliin dukaanka tuulada iyo maqaayad. Aaga waxaa ku yaala hoolka cayaaraha iyo dhismo ay ku kulmaan dadka tuulada. Sanad walba bisha agoosto waxaa jira suuq weyn oo lagu magacaabo suuqa Sannerud waxaana soo booqda ku dhowaad 10 000 oo qof.

## Kvinna i fokus
## (Diirad saarida haweenka)

Tababar lacag la'aan ah oo loogu talo galay haweenka! Dhamaan haweenka raba inay tababartaan waxaan leenahay soo dhawaada si caafimaadkiina u hagaago oo aad u awoodaan inaa wax badan qabsataan. Wixii su'aalo ah iyo isdiiwaangelinta kala xiriir: 073-024 55 77.

**Cinwaanka:** Kulturens hus (Guriga dhaqanka),
Skolgatan 7, Laxå

Talaado walba iyo khamiis walba 16.00-17.00

## Träffpunkt 18

Träffpunkt 18 waa meel ay ku kulmaan dadka hawl gabka ah iyo dadka baahiyaha gaarka qaba. Halkaan waxaad ka qeyb qaadan kartaa dhaqdhqaaqyo kala duwan iyo kooxo kala duwan adiga iyo dad kaleba. Dhaq dhaqaaqyada waa maalin walba laga bilaabo 13:00, tusaale ahaan qaxwe cabis, jimicsi, bingo ama socsocod. Barnaamijyada waxaa laga soo qaadan karaa goobta bar kulanka ee Träffpunkt 18 ee bartamaha Laxå. Gobta waxaa kaloo dhaqdhaqaaqyo ku sameysta Laxå PRO iyo ururo kale.

Faahfaahinta xiriirka

Telefoonka: 0584-47 33 98

Cinwaanka: Postgatan 18, Laxå (lookaalka träffpunkt 18)

Röda korset: (laanqeyrta cas) 073-038 70 90

Svenska kyrkan:  (kaniisadda Iswiidhan) 0584-106 35

## Laxå PRO förening

Laxå PRO waa jaaliyad weyn oo leh hawlo badan. Waxay leedahay shirar, safaro, goobo waxbarasho, qoob ka cayaar. Boojo, bowling, koorsooyin, fayodhowr iyo qaar kaloo badan. Dadka haysta nooc hawlgabnimada ka mih waxuu xubin ka noqon karaa PRO. Haddii aad rabto inaa xubin ka noqoto PRO waxaad booqan kartaa xafiiska qaabilaada ee bartamaha Laxå, la xiriir jaaliyadda Laxå ama booqo bogga shabakada internetka.

faahfaahinta xiriirka

Cinwaanka: Postgatan 18 (lookaalka träffpunkt 18)

Mail: laxa@pro.se

Bogga shabakada internetka: www.pro.se/medlem

# KU NOOLAASHAHA, DEGITAANKA IYO SHAQADA



# Isdhexgalka iyo suuqa shaqada

Degmada Laxå dadka Iswiidhan uga soo guura wadan kale ama dhowaan u soo guuray degmada Laxå waa ay caawineysaa. Isku duwaheena waaxda isdhexgalka ayaa kuu sheegi kara sida degmada ay u shaqeyso. Waxaad caawinad ku heli kartaa adigoo la xiriira hay'ado kala duwan. Waxay noqon karaan hay'adda caymiska bulshada, hay'adda canshuuraha, hay'adda socdaalka iyo xafiiska shaqada. Waxaad kaloo caawinaad ka heli kartaa la xiriirida dugsiyada iyo daryeelka caruurta. Qofka ku cusub Iswiidhan waxaa kaloo loo soo bandhigaayaa ka qeyb qaadashada hanuuninta bulshada.

Qaybta suuqa shaqada waxay dadka ka caawisaa inay helaan shaqo wanaagsan.

Waxay caawinaayaan dadka da'doodu u dhexeyso 16 iyo 64. Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa inaa tahay dhalinyaro, ku cusub wadanka Iswiidhan ama aad shaqo la'aan tahay muddo dheer. Qaybta suuqa shaqada waxay kaa caawin kartaa waxbarasho iyo tababar shaqo. Tababarka shaqada waa in la tijaabiyo shaqada ama laylis lagu qaato luqadda Iswiidhishka. Adiga iyo tababaraha shaqada ayaa wada qorsheynaaya caawinaada kugu haboon.

**Faahfaahinta xiriirka**

Isku duwaha: 0584-47 33 84

waxay furan tahay maalmaha shaqada saacadaha. 8.00-16.00

## Mas’uuliyadda wax qabadka degmada

Degmada waxaa waajib ku ah inay caawinto dhalinyarada da’doodu ka yartahay 20 jir ee ka sigsaaga dugsiga sare ama aan wligood bilaabin dugsi sare. Ujeedadu waa in la caawiyo dhalinyarada si ay u dhameystaan waxbarashada dugsiga sare ama ay u helaan wax qabad kale. Caawinaada waa ikhtiyaari.

Telefoonka: 0584-47 33 80 eller 073-024 55 07

Mail: KAA@laxa.se

## Dugsiga dadka waaweyn iyo SFI (af iswiidhishka loogu talo galay ajaanibta)

**Allévux ee Hallsberg**

Allévux waa dugsi loogu talo galay dadka waaweyn ee raba inay wax bartaan. Halkaan ayaad wax kub aran kartaa hadii aad ka diiwaan gashan tahay Laxå. Waa inaa ugu yaraan tahay 20 jir. Waxbarashada Allévux waa lacag la’aan. Macluumaad dheeri ah kala xiriir la taliyaha waxbarashada.

Allévux waxaa laga helaa: Koorsooyin heerka dugsiga sare Waxbarasho xirfadeed, SFI – Af Iswiidhishka loogu talo galay ajaanibta, La taliyaha waxbarashada iyo xirfadaha

Telefoonka: 0582-354 32 ama 0582-354 00

Mail: vux.vagledning@allevux.se

# Ku baro Laxå af iswiidhishka iyo cilmiga bulshada

Haddii aad ku cusub tahay Iswiidhan iyo Lxåwaxaad ka qeyb qaadan kartaa koorsooyin kala duwan. Waxaa ka mid ah inaa af iswiidhishka barato ama aad wax ka barato bulshada Iswiidhan.

**Horumarinta waxbarashada**
Cinwaanka: Von Boijgatan 14, lookaalka lagu kulmo ee Träffpunkt 14
Telefoonka: 073-555 78 98
Isniin walba, Arbaco walba iyo khamiis walba gelinka hore

**Ururka waxbarashada dugsiga dadka waaweyn**
Cinwaanka: Skolgatan 7, 695 80 Laxå
Telefoonka: 019-611 94 80
Talaado walba 9.30-12.00 iyo jimco walba 9.30-12.00.

**Ururka waxbarashada ABF**
Cinwaanka: Centrumtorget 2
Isniin walba 13.00-16.00 iyo jimco walba 13.00-16.00

**Bergskyrkan**
Cinwaanka: Bergskyrkan waxay ku taalaa Coop gadaashiisa
Arbaco walba 09.30-11.00

# Gaadiidka dadweynaha

**Gaadiidka basaska**

Bogga shabakada gaadiidka gobolka www.lanstrafiken.se waxaad ka arki kartaa jadwalka iyo meelaha basku istaago. Ikidhka waxaad ka iibsan kartaa baska markaad soo kortid ama Laxå dukaanka cayaaraha ee ku yaala Centrumtorget. Waxaa kaloo tikidhada ka iibsan kartaa bogga shabakada gaadiidka gobolka appka shabakada gaadiidka gobolka.

Dukaanka cayaaraha Laxo waxay kaa caawinaayaan inay kaaga jawaabaan su'aalo fufud.

Nambarka telefoonka dukaanka cayaaraha Laxå waa: 0584-100 69

**Gaadiidka maxalliga**

Wa bedelka qofka deggan 1 km iyo ka dheer meesha basku istaago ama baska uu agtiisa ka baxo wax ka yar toban goor maalinkii. Basku wuxuu ka baxaayaa degaankaaga ilaa magaalada Laxå.

Bogga shabakada gaadiidka gobolka waxaad ka akhrisan kartaa soda gaadiidka maxalliga u shaqeeyo. Boka resa på telefonnummer: 0771-92-00 00.

**Tareenka**

Xarunta safarada ee Laxå waxaa soo mara tareeno fara badan. Warbinada ku saabsan xilliyaa tareenka iyo tikidhada waxaad gashaa: www.reseplanerare.resrobot.se. Dhamaan jadwalka wadanka ayaa lagu ururiyay meeshaas.

## Återbruket tur & retur


Återbruket waa dukaan gacan labaad ah oo ku yaala magaalada Laxå. Dukaanka waxaa maamula degmada. Haddii aad rabtid inaa wax kuk tabarucdo dukaanka tos u gee ama xarunta dib u warshadeynta ee Mosjön. Dukaanka wuxuu alaabta qabanaayaa, talaado walba iyo khamiis walba 9.00-15.00. Jimco walba 9.00-11.00.

Saacadaha dukaanka furan yahay: Khamiis walba 10.00-18.00

Telefoonka: 070-691 61 86

Cinwaanka: Postgatan 10, Laxå

# DARYEEL CAAFIMAAD, KAALMO IYO CAAWINAAD



# Laxå vårdcentral
# (xarunta daryeelka caafimaadka)

Inta badan caafimaadka waxaad u tegi kartaa (vårdcentral)xarunta daryeelka caafimaadka. (Vårdcentralen) xarunta daryeelka caafimaadka waxay tusaale ahaan kaa caawin karaan haddi dhaawac ku gaaro, qandho waqti dheer ku hayso ama aad rabtid inaa sigaar cabidda iska joojisid. Vårdcentralen xarunta daryeelka caafimaadka waxaa kaloo ay ka caawineysaa haddii aad qabto xannuunka dhimirka. Waxaad heleysaa kaalmo iyo qof aad la hadashid. Ballan ka sameyso adigoo telfoon soo diraaya ama booqanaaya bogga shabakada www.1177.se.

Telefoonka: 0584-882 00

Saacadaha uu furanyahayr: 08.00-17.00

Cinwaanka: Gamla Tivägen, Laxå.

Haddii ay jiraan xanuuno ama dhaawacyo degdeg ah waxaad tagtaa gargaarka degdega ee isbitaalka. Wac 1177 haddii aadan ogeyn meesha aad la xiriireysid.

# Folktandvården Daryeelka ilkaha dadweynaha ee Laxå

Haddii adiga ama ilmahaaga u baahantihiin daryeelka ilkaha waxaa jira folktandvården daryeelka ilkaha dadweynaha ee Laxå. Daryeelka ilkaha ee ilmaha iyo dhalinyarada waa bilaash. Ballan ka sameyso adigoo telefoon soo diraaya ama booqo bogga shabakada www.1177.se.

Telefoonka: 0584-882 80

Cinwaanka: Gamla Tivägen Laxå (Laxå vårdcentral)

# Familjecentralen (Xarunta qoyska)

Xarunta qoyska (familjecentral) waa meel ay ku kulmaan qoysaska caruurta le. Dadka waalidka noqon raba iyo waalidka haysta caruurta da'doodu u dhexeyso 0–18 jir waa lagu soo dhaweynaayaa xarunta qoyska (familjecentralen). Halkaan waxaa ka shaqeeya la taliyeyaal, macallimiin, kalkaaliso caafimaad iyo umuliso. Halkaan waxaad ka heli kartaa caawinaad ku saabsan su'aalaha caafimaadka caruurta ama taageerada waalidnimada. Waxaa kaloo laga qeyb qaadan karaa kooxaha waalidiinta si loo helo kulanka taagerada. Waxqabadka waa lacag la'aan.

Waxaad wici kartaan ama booqan kartaan xarunta qoyska familjecentralen haddii ay jiraan su’aalo ama fikrado. Cinwaanka booqashada waa Gamla Tivägen (dabaqa hoose ee Laxå vårdcentral).

## Öppna förskolan (Xannaanada furan)

Waxaa loogu talo galay waalidka haysta ilmaha da’doodu u dhexeyso 0–6 jir. Halkaan waxaa tusaale ahaan sameyn kartaan in la cayaaro, la heeso iyo la wada qaxweeyo.

Isniin walba 13.30-15.30. Arbaco walba 9-11.30.

## Babycafé  (KAffeteeriyada dhallaanka)

Waxaa loogu talo galay waalidka haysta ilmaha da’doodu u dhexeyso 0–18 bilood.

Talaado walba 9.00-11.30

Telefoonka: macallinka 0584–47 31 97,
la taliyaha 0584–47 31 28

## Barnavårdscentralen (BVC) (Xarunta daryeelka caafimaadka caruurta)

Halkaan waxaad kula kulmi kartaa kalkaaliso caafimaad. Xarunta daryeelka caafimaadka caruurta (barnavårdscentralen) waxaa lagaa caawinaayaa caafimaadka ilmahaaga. Kaalmada waa ikhtiyaari waana lacag la'aan.

Telefoonka: 0584-882 24, 0584-882 26

## Barnmorskemottagningen (BMM) (Qaabilaada umulisada)

Qofka dhalinyarada ah ama qofka weyn wuxuu la kulmi karaa umuliso. Umulisada waxay ka jawaabi kartaa su'aalaha ku saabsan uurka iyo dhalitaanka ama waxay ku siin kartaa talo ku saabsan caafimaadka iyo galmada. Qofka dhalinyarada ah wuxuu sidoo kale la xiriiri karaa qeybta qaabilaada dhalinyarada ee Hallsberg ama booqo www.umo.se.

Telefoonka: 0584-882 21

# Socialtjänsten
# (Xafiiska adeega bulshada)

Dadka oo dhan haddii ay u baahdaan caawinaad iyo taageero waa inay heli karaan. Taas waa mas'uuliyadda xafiiska adeega bulshada. Waxaa jiri kara sababo badan oo uu qofku ugu baahan karo caawinaad iyo taageero.

xafiiska adeega bulshada waxaa tusaale ahaan uu caawini karaa dadka ay dhibaato ku hayso khamri cabidda ama aan dhaqaalahoodu ku filneyn. Waxay caawini karaan caruurta iyo dhalinyarada dhibaateysan. Adiga waalidka ah waxaad ka heli kartaa wadahadal talo iyo tusaale ah oo ku saabsan waalidnimada.

Haddii aad tahay qof da'ah ama naafo ah waxaad codsan kartaa noocyo kala duwan oo taageero ah. Waxay noqon kartaa in guriga caawino dheeri ah laguugu siiyo, tusaale ahaan nadaafada ama is daryeelidda. Waxaa kaloo ay noqon kartaa in laguu guuriyo guri aad ka heli karto caawinaad dheeri ah. Waxaa kaloo heli kartaa taageero si aad u qabsatid waxyaabo adiga kuu fiican maalinkii.

Dadka ka shaqeeya xafiiska adeega bulshada waa inay kula hadlaan ka hor inta aysan go'aansan taageerada ay ku siinaayaan. Waxaa saaran waajib sir ilaalin ah. Waajibka sir ilaalinta micnihiisu waa inaysa cidna u sheegin waxaad adiga u sheegtid.

Waa lacag la'aan in lala hadlo xafiisk adeega bulshada. Mar walba waad la tashan kartaa xafiiska adeega bulshada ama waxaad sameyn kartaa codsi adiga kuu gaar ah haddii aad u baahatid caawinaad. Kala xiriir xafiiska adeega bulshada e-mail, telefoon ama soo booqo qeybta soo dhaweynta.

**Faahfaahinta xiriirka**

Xiriirnta telefonka: 0584-47 31 00

Cinwaanka: Postgatan 2-4 , 695 30 Laxå

Saacada ay furantahay qeybta qaabilaada

Isniin-khamiis 08.00-12.00 iyo 13.00-16.00.

Jimce 08.00-12.00 iyo 13.00-15.00

# XAALAD DEG DEG AH

Haddii ay jiraan xaalado deg deg ah wac 112 haddii kale xafiiska adeega bulshada waxaa la heli karaa maalmaha shaqada 8.00-16.30.

Waqtiyada kale waxaa lala xiriiri karaa xafiiska addega bulshada heeganka iskaleh: 019-21 41 05

# Naafanimo

In naafo la noqdo waxay keeneysaa inaa u baahatid caawinaad dheeri ah oo la xiriira nolol maalmeedkaaga. LSS macnaheedu waa sharciga taagerada iyo adeega dadka naafada ah. Sharciga wuxuu xaq u siinaayaa qofka naafada ah inuu helo adeeg iyo taageero. Qof walbo waa inuu u noolaadaa sida dadka kalem xitaa haddii uu qabo baahiyaha gaarka ah. Caruurta iyo dadka waawyn labadaba waxay xaq u leeyihiin taageerada LSS.

Haddii aad rabtid inaa codsatid taageerada la siiyo naafada, waa inaa la xiriirtaa degmada. Mas’uul qaabilsan taageerada ayaa kula hadli doona oo go’aaminaa nooca caawinaada aad heli kartid.

**Faahfaahinta xiriirka**

Telefoonka: 0584-47 31 00

Postgatan 2-4و 695 30 Laxå

# Adeega

Adeega daryeelka iyo xannaanada wuxuu ka koobnaan karaa dhowr qeybood.

Alaarmiga badbaadada: Si aad badbaado u dareento waa inaa codsataa in laguu rakibo alaarmiga badbaadada.

Cunto qeybin: Qofka 75 jir ah ama ka weyn wuxuu codsan karaa in cuntada loogu keeno gurigiisa.

Kooxda adeega: waxay ka shaqeysaa u adeegida dadka da’da ah ama naafada ah, tusaale ahaan xaaqida barafka. Cows jarida iyo waxyaabo kale oo yar yar, tusaale ahaan surida daahyada iyo beddelida nalalka.

## Adeega gaadiidka

Haddii qofka naafo yahay oo ay aad ugu adagtahay inuu iskiis u socdo ama uu ku safro gaadiidka dadweynaha, wuxuu xaq u yeelan karaa inuu helo adeega gaadiidka. Adeega gaadiidka waxaa mas’uul ka ah gaadiidka gobolka ee dedgmada mas’uul kama ahan.

Mas’uulka adeega gaadiidka

019-602 39 00

**Warbixin dheeri ah:** www.lanstrafiken.se/serviceresor

## Talo siinta deynta iyo miisaaniyadda

Talosiinta deynta iyo miisaaniyada waxaa loogu talo galay dadka u baahan in laga caawiyo hagaajinta dhaqaalahooda. Waxay noqon kartaa in dhaqaalaha uusan ku filneyn ama ay deynta dhibaato ku hayso. Talo siinta waa lacag la’aan qofka lala hadlaayana waxaa saaran waajib sir ilaalin ah.

Faahfaahinta xiriirka

Telefoonka: 0584-47 32 11

Maktabadda Laxå, Postgatan 13

## Kaniisada Iswiidhan ee Laxå

• Kaniisada Iswiidhan ee degmada Laxå waxay u qeybsantaa saddex qeybood.

• Kaniisada Ramundeboda iyo Casselgården (magaalada Laxå)

• Kaniisada Finnerödja-Tiveds

• Kaniisada Skagershults (Hasselfors)

Kaniisada Iswiidhan waxay khibrad dheer u leedahay la kulanka dadka dhibka iyo murugada ku jira. Haddii aad u baahantahay inaa qof la hadashid, waxaa jooga baadariga iyo wadaadka xiriiriyaha kaniisada iyo bulshada oo labadaba diyaar u ah in lala xiriiro.

**Faahfaahinta xiriirka**

Xiriiriyaha kaniisada iyo bulshada: 0584-44 46 33

Baaderiga: 0584-44 46 30, 0584-44 46 32

Cinwaanka: Kyrkogatan 6, 695 30 Laxå

E-post: bodarne.pastorat@svenskakyrkan.se

## Dans för Hälsa (qoob ka cayaarka caafimaadka)

Dans för Hälsa waxaa loogu talo galay dhalinyarada 12-16 jirka ah kuwaasoo inta badan walaacsan, welwelsan ama calool xanuun haayo. Qoob ka cayaarka waxaan u sameyneynaa inaa dareeno caafimaad oo u barano inaa nasano. Ma u baahnid inaa hore u lahayd waayo aragnimo qoob ka cayaarka. Kooxda waxaa hogaaminaaya macallin tababaran. Haddii aad ogtahay inuu jiro qof raba inuu tijaabiyo waxaad la xiriirtaa la taliyaha degmada dhinaca xillifiraaqada ama la taliyaha xarunta qoyska.

**faahfaahinta xiriirka**

La taliyaha xilli firaaqada: 070-640 72 22

La taliye: 0584-47 31 97 ama 0584-47 31 28

## Caawinaad deg deg ah

Telefoonada aad wici kartid haddii adiga ama qof kale uu xanuunsanaayo oo u baahan caawinaad deg deg ah.

## 112

112 waa nambarka gargaarka deg dega ah ee Iswiidhan. 112 waa furan yahay saacad kasta. Wac 112 haddii adiga ama qof kale uu ku jiro xaalad deg deg ah una baahan gargaar deg deg ah. Wac 112 haddii caawinaad deg deg ah uga baahan tahay booliska, dabdamiska ama ambalaasta.

## Polisen (Booliska)

Wac nambarka gargaarka deg dega aht 112 si aad u hesho caawinaad deg deg ah. Wac 114 14 oo la xiriir (Polisen) booliska haddii aysan jirin xaalad deg deg ah. Saldhigga booliska ee ugu dhow wuxuu ku yaalaa Hallsberg, cinwaanka Västra storgatan 6–8.

Saacadaha uu furan yahay iyo faahfaahinta xiririka waxaad ka heleysaa bogga shabakada booliska, www.polisen.se.

Shabakada waxaa laga helaa warbixin dheeri ah, foomam iyo fursad dacwad boolis lagu gudbiyo.

# 1177

Waxaad wici kartaa nambarka telefoonka 1177 haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu xanuunsado. Waxaa markaas talo ku siinaaya kalkaaliso. Saacad walba waa wici kartaa. Haddii loo baahdo waxay kuu sheegaayaan meesha aad u raadsan kartid daryeel caafimaad. Haddii aad u baahan tahay caawinaad deg deg ah oo xagga dhimirka ah waxaad wici kartaa 1177. Bogga shabakada 1177.se waxaa laga helaa warbixin badan oo ku saabsan caafimaadka iyo cudurada.

# BRIS

Haddii aad ka yartahay18 jir oo aad caawinaad u baahantahay waxaad la xiriiri kartaa Bris. Waa wici kartaa, qoraal kula sheekeysan kartaa ama meyl ayaad u diri kartaa. Qofka weyn xitaa wuu la xiriiri karaa Bris haddii ay jiraan su'aalo ama welwel ku saabsan caruurta.

Telefoonka caawinaada ilmaha: 116 11.

Telefoonka caawinaada dadka waaweyn: 0771-150 50 50.

Bogga shabakada: www.bris.se

## Kvinnofridslinjen

Waxaad wici kartaa kvinnofridslinjen haddii laguu geystay hanjabaad, rabsho, xadgusub galmo ama si xun laguula dhaqmo. Ma tahay ruux qaraabo ama saaxiib la ah qof dhibtaas haysato waad soo wici kartaa. Waqti walba waa furanyahay khadka waana lacag la’aan. Wicitaanka kama muuqanaayo biilka telefoonka.

Telefoonka: 020-50 50 50.

LAXÅ
KOMMUN